

FAQs - Kooxda daneeyaasha

Su'aal	Jawaab
1. Waa maxay Kooxaha daneeyaasha?	<p>Sida ku xusan Xeerka Coroners Act 2006, qoyska ugu dhow ee qofka dhintey waxay xaq u leeyihiin in lala socodsiiyo oo ay ku lug yeeshaan go'aamada qaarkood ee la xiriira baaritaanka.</p> <p>Kooxaha xiisaynaya waxay noqon karaan dad kale ama ururo kale oo mayd baadhaha uu u arko inay sidoo kale dano gaar ah ka lahaayeen dhimashada. Xiisahoodu waxay u baahan tahay inay ka badnaato ama ka duwanaato xubin ka mid ah dadweynaha guud.</p>
2. Haddii aan noqdo shakhsi danaynaya baaritaanka ee weeraradii masaajidka Christchurch ee 2019, maxaa dhici doona?	<p>Haddii aad noqotid qof xiiseynaya baaritaanka, waxaad codsan kartaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan weerarrada oo waxaad dejisaa arrimo ama walaacyo aad u aragto inaan lagu xallin nidaamka dacwad-qaadidda ama Guddiga Boqortooyada ee Baaritaanka.</p> <p>Codsi kasta oo macluumaad ah iyo arrimaha iyo walaacyada waxay u baahan yihiin inaysan ka baxsanayn sharciga baaraha. Si aad wax dheeraad ah uga ogaato baarayaasha Maxkamadda, waxaad booqan kartaa bogga Websaydhadaka adeegayaasha Baarayaasha https://coronialservices.justice.govt.nz/about/</p> <p>Sidoo kale, Madaxa dambi baarista wuxuu si rasmi ah ugu wargalin doonaa dhammaan dhinacyada daneeya xaalado kasta oo muhiim ah inta ay socoto baaritaanka, sida haddii baaritaan la furo ama la dhammaystiro iyo natijada baaritaanka kasta.</p> <p>Xilliga dambe ee hawsha, haddii dhageysi baaritaan la qabanayo, dadka daneynaya waxaa la ogeysiin doonaa taariikhda, waqtiga iyo goobta. Dhinacyada danaynaya waxay heli karaan fursad ay kaga qayb galaan baaritaan kasta.</p>
3. Ma ogaan karaa waxa dhacayo baaritaanka dhaxdiisa xitaa haddii aanan u diiwaangashanayn koox danaynaysa?	<p>Haa. Waxaad ku ogaan kartaa waxa dhacaya adigoo booqanaya boga shabakadda ee weerarada Masjidka www.coronialservices.justice.govt.nz/masjid-attacks-coronial-process . Bogagga websidka si joogto ah ayaa loo cusbooneysiin doonaa inta lagu gudajiro hawsha.</p>
4. Haddii aan ahay xubin reerka ah oo ka tirsan qofkii Shahiiday oo Madaxa Dambi baadhistana mar hore ila soo xiriiray, ma waxaan u baahanahay inaan isdiwaangaliyo si aan u noqdo shakhsi kujira daneeyaasha?	<p>Maya, uma baahnid.</p>

Su'aal	Jawaab
<p>5. Maxaa dhacaya haddii aan ahay xubin ka mid ah reerka Shahiidka oo aan weliba ahay dhibbane xabbadda ku dhaawacmay? Miyaan iska diiwaangeliyaa sidii shakhsi kujira daneeyaasha?</p>	<p>Maya. Haddii madaxa baarista uu horeyba kula soo xiriiray, uma baahnid inaad isu diiwaangeliso sidii shakhsi kujira daneeyaasha.</p>
<p>6. Sideen ku noqdaa qof kujira dadka danaynaya baaritaanka weeraradii Masjidka?</p>	<p>Tani waxay kuxirantahay duruufahaaga:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Haddii aad tahay xubin katirsan qoyska Shaheedka oo uu Madaxa Dambi baarista horeyba kula soo xiriiray, uma baahnid inaad isu diiwaangeliso si aad u noqoto shakhsi kujira daneeyaasha. • Haddii aad tahay dhibbane, ama waaliidiinta dhibbanaha, ee dhaawacyada rasaasta ee weerarka, waxaad isku diiwaan gelin kartaa inaad tahay shakhsi daneeyaasha ah adoo emailu diraya Xafiiska Madaxa Dambi baarista coronial.response@justice.govt.nz ama wacaya (09) 916 9151. • Shakhsiyadka kale iyo ururada raba inay noqdaan daneeyaasha, waxaad u baahantahiin inaad dalb soo gudbisataan. Madaxa baarista wuxuu tixgelin doona dalabkaaga wuxuuna kuu sheegi doona natiijada. Fadlan ka eeg bogagga shabakadda weerarada Masjidka halkan www.coronialservices.justice.govt.nz/masjid-attacks-coronial-process sida loo codsado
<p>7. Waxaa jira koox badan oo naga mid ah oo doonaya inay noqdaan kooxda daneeyaasha. Haddii aan rabno, ma u soo dalban karnaa koox ahaan?</p>	<p>Haa, waad awoodaan. Kaliya waxaad ubaahan tihin inaad dhexdiina kuheshiisaan qofka kooxda wakiilka ka noqonayo. Markaa qofkaasi wuxuu ku codsan karaa si uu noqdo koox danaynaysa magaca kooxdaada. Marka wakiilkaagu codsado, waa inay sharxaan:</p> <ul style="list-style-type: none"> • inay matalaan kooxda • Danaynta kooxda ee baaritaanka. <p>Madaxa baaritaanka wuu tixgelin doona dalabka wakiilka wuuna ogeysiin doona natiijada. Fadlan ka eeg bogagga shabakadda weerarada Masjidka halkan www.coronialservices.justice.govt.nz/masjid-attacks-coronial-process sida loo codsado</p>
<p>8. Ka waran haddii ay kooxi ka kooban tahay dad xabbad ku dhaawacmay?</p>	<p>Haa, waad awoodaan. Qof kastaa wuxuu u baahan yahay oo keliya inuu ogeysiyo Xafiiska Madaxa Baarista cidda uu wakiil u yahay. Waxaad email u diri kartaa</p>

Su'aal	Jawaab
Ma isku diwaangalin karnaa koox ahaan?	<p>coronial.response@justice.govt.nz ama wici kartaa (09) 916 9151.</p> <p>Markaa wakiilku wuxuu noqon karaa qofka ka helo waraaqaha kooxda daneeyaasha Madaxa xafiiska dembi baarista isagoo ka wakiil ah dhammaan dadkii xabbada ku dhaawacmay ee soo magacaabay.</p>
9. Miyaan ka heli karaa taageero guddi qareena ah haddii aan isu diiwaan geliyo kooxda daneeyaasha?	<p>Marxaladdan, adeegyada qareennada ay maalgelinayso Wasaaradda Caddaaladda ayaa mudnaanta la siinayaa si ay ugu adeegaan qoysaska Shahiidka.</p> <p>Haddii ay dhaawacyo rasaas ah kaa soo gaartey weerarada oo aad jeceshahay helitaanka kaalmadan sharciga ah, fadlan la xiriiir Xafiiska Madaxa Dambi Baarista adoo email u dirayo coronial.response@justice.govt.nz ama wacayo (09) 916 9151. Codsiyada waxaa loo tixgelin doonaa sida ay kiisaska ukala horeeyaan.</p>
10. Ma codsan karaa inaan noqdo kooxda danaynaysa heer kasta oo ay hawshu marayso?	<p>Haddii aad rabto inaad dalbato inaad noqoto kooxda xiiseyneysa, waxaan kugula talineynaa inaad hadda sidaas sameyso.</p> <p>Haddii dalabkaagu guuleysto, tani waxay ku siin doontaa waqti aad ku weydiisato macluumaad Madaxa xafiiska baarista oo aadna u sheegto arrimaha ama welwelka aad u aragto inaan lagu xallinin nidaamka dacwad-qaadista ama warbixinta Guddida Boqortooyada. Hawshan ayaa hadaba u socota qoysaska Shahiidka.</p>